



## **Qudbadii Guddoomiyaha Ururka Dhalinyaradda Rajada Soomaaliyeed (Hope Generation)**



**Munaasabada Sanadguurada 2-aad ee Ururka**

**Taariikh: 21 oktober, 2016. Muqdisho Soomaaliya**

بسم الله الرحمن الرحيم.

Madaxada Qaran,

Mus'uuliyiinta Jaamacadaha,

Mudanayaasha Ururada Dhalinyarada,

Guddoomiyayaasha Bulshada Rayidka ah,

Marti sharafta Qiimaha badan,

Aqoonyahanka Umadda Haga,

Dhamaantii Naga guddooma Salaanta Islaamka

السلام عليكم ورحمة الله وبركاته.

Salaan kadib, waxaa sharaf iyo Qiimo Gaar ah noo leh inaad Nagala soo qayb gasheen Sanad Guuradii 2aad ee Uruka Dhalinta Rajada Soomaaliyeed oo dhidibadda loo taagay October 2014kii.

Waxaan Hambalyo ku aadan Munaasabadda dabaal degga u dirayaa golayaasha iyo Dhammaan Xubnaha ururka oo si wadar iyo midinimo ku dheehantahay waqti, fikir, iyo maalba ugu huray xaqiijinta ujeedooyinka iyo fulinta qorshe sanadeedka aan maanta kusoo afmeerayno munaasabaddan.

Aniga oo dhawraya waqtiga kooban een haysto, waxaan rabaa inaan si kooban u soo bandhigo hawlihii Ururka u qabsoomay Sanadkii tagay, Diiraddana Saaraya Yididiilooyinka uu tiigsanayo Ururku.

Mudadii 2da sano ahayd ee ururku jiray, waxaan Garwaaqsanay sida dhalinteenu heegan ugu tahay u adeegidda Bulshada, ilaalinta midnimada, wax wada qaybsiga iyo wadaaga aragtiyada.

Sidoo kale, waxaan soo taabanay bugtada iyo dhibaataada baaxadda leh, ee haysta dhalinyarada soomaaliyeed, iyo baahida ay u qabaan gar-gaar midaysan, badbaadin agaasiman, hoggaan hagaagsan, taas oo dhiiragalin mugweyn u noqotay xubnaha Ururka **Dhalinta Rajada Soomaaliyeed**, diyaarna aan u nahay inaan la wadaagno Ururada aan isku bahda nahay, iyo dhammaan inta jecel samaha.

**Hawlaha Ururka waxaan u kala qaybinay dhawr xafiis, oo ay kamid yihiin:**

- 1- **Xafiiska wacyigalinta:** waxaan ugu talagalnay inuu kor u qaado wacyiga dhaliyarada, si ay uga bad-baadan dhaqamada xun xun, una noqdaan dhalin wanaagga ka talisa iyagoo isku kalsoon garaadkooduna bisilayahay. Hawlaha uu arintaas u maro waxaa kamid ah:
  - A- Dood ciliyeed
  - B- Talo wadaag
  - C- Muxaadarooyin
  - D- Xafladaha ciidaha iyo Munaasabada Wadaniga ah.
  - E- Ol'ole qaadis hadba arinta taagan
  - F- Iwm .

Waxaa sanadkii la soo dhaafay ay gaartay wacyi galinta Uruka kumanaan isugu jira ardayda dugsidada, jaamacadaha iyo bulshaweynta kale.

2- **Xafiiska Naadiyada:** waxaan ugu tala galnay, in dhalinta aan iskugu xirno haddba intii dookh wadaag ah, si ay u soo baxdo hal-abuurka ku keydsan dhalinta, una muuqado waxqabadkooda, waxaana noo dhisan hadda 2 naadi oo kala ah, Naadiga Hal-Abuurka iyo Naadiga Akhriska iyo Qoraalka.

Hawlaha uu qabtay waxaa kamida ah:

A- Tababarro qoraalka iyo akhrinta ku saabsan

B- Akhrin wadareeg xubnaha Naadiga dhex maray.

3- **Xafiiska Tababarada:** waxan ugu talagalnay inaan dhalinta ku barno xirfado kala duwan oo taabanaya nolashooda oo ay ku shaqaysan karaan hadda iyo hadhawba, iyo inaan ku soo saarno hoggaan hagaasan. Tababarada uu qabtay xafiiskan waxaa kamid ah:

A- Hormarinta shakhsiga

B- Hogaanka toosan

C- Cunto karin

D- Iyo sida loo doorto takhasuska Jamcadeed oo ay ka faa'iidaysteen sanadkii dhammaaday ku dhawaad 1000 arday oo ka soo qalin jabisay Dugsiyada sare ee Gobolka banaadir.

E- Waxa aan sanadka ku soo darnay waaxda tababarka iyo hormarinta arimaha qoyska.

Ururku waa uru furan oo umadda soomaaliyeed ay leedahay, taasi waxay qasabtay inaan baahinno habmaamulkiisa oon furno Laama badan, si qofkasta uu fursad ugu helo inuu kamid ahaado kana shaqeeyo Xaqiijinta Ujeedooyinka ururka asaga oo jooga Deegaan kiisa, waxa hadda noo furan ilaa 5 farac oo degmooyinka Gobolka baadir ka tirsan, waxaan qorshaynaynaa inaan ka furno farac degma kasta oo dalka kamid ah, Hadduu Eebe Idmo.

Waxaan Madaxda ugu baaqaynaa inay ilaaliyaaan karaamada iyo midnimada umadda soomaaliyeed, dhalinyaradana ku hagaan helinka toosan, kana dhawraan dhaqanka ku salaysan qabyaaladda iyo nin jeclaysiga, xaaldaacin kara midnimada, walaaltinimada iyo wax-wada qaybsida asalka u ah dhaqanka soo jireenka ah ee Soomaaliyeed.

Dhalinyarada soomaaliyeed, waxaan xasuusinayaa inay yihiin Hoggaanka maanta ee bulshada, ayna isku diyaariyaan inay kaalintooda ka soo baxaan, dhalinyarooy ha sugina gacan haadin beenaale, tilmaan shisheeye, iyo talo xume sokeeye.

Aqoonyahaka Soomaaliyeedow, noqo horumariyaha bulshada, inftiinka umadda, badbaadiyaha dadka, hanoqon burburiye xeeldheer, boobe xariif ah, nabar xanuun badan, hana limid noqon Jaahilka jihadu ka wareertay, Qab-Qablaha Qabiilku madax maray.

Gabagabadii Hadalkayga, waxaan Mahad iyo bogaadin u jeedinayaa sama jeclayaasha aan marnaba nagala hakranin xoog, xeel, iyo xoolo, waxaana qiraynaa inaad tihiin rajadii dalkeena.

Waad mahadsantihii. Guul Joogta ah ayaan Eebe ka baryaynaa.

والسلام عليكم ورحمة الله وبركاته.